Ruqsada Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

Dab-damiyaasha

Waxaa la cusbooneysiinta Oktoober 2024

Shuruudaha Ganacsiyada

Nooca dab damiyaha aad ugu baahan tahay goobtaada ganacsiga waxaa go'aaminaaya nooca ganacsiga iyo agabka yaala dhismaha. Kuwaan ayaa sidoo kale go'aansha meesha la dhigi doono agabka dab damiska.

Dukaamada tafaariiqda iibsha, xarumaha kaydka, iyo garaashyada baakadaha lagu diyaarsho waxaa qasab ah inay dhigaan dab damiyaasha Heerka 2A 3,000 oo iskuweer fiid kasta. Waxaa qasab ah inuu jiro ugu yaraan hal dab damiye oo la dhigo dabaq kasta. Agabka dabka damiya waa in la dhigaa goobta si dadku aysan ugu baahan inay u raadsadaan meel u jirta wax ka badan 75 fiit si ay u soo qaataan.

Garaashyada baakinku waa inay dhigaan agabka dab damiska ee heerka 2A meel kasta oo dadku ku lugeeyaan.

Dhismayaasha xafiiska, dhismayaasha la dagan yahay, sida dabaqyada la dagan yahay ama gudaha xaafadaha ah, iyo goobaha dadwaynuhu iskugu yimaadaan waa inay dhigaan agabka dab damiska 6,000 oo iskuweer fiid kasta. Waxaa qasab ah inuu jiro ugu yaraan hal dab damiye oo la dhigo dabaq kasta. Agabka dabka damiya waa in la dhigaa goobta si dadku aysan ugu baahan inay u raadsadaan meel u jirta wax ka badan 75 fiid si ay u soo qaataan.

Qolalka Wax lagu kariyo oo leh kariyaasha saliida waxaa qasab ku ah dab damiska 10BC oo yaala meel u jirta wax kayar 30 fiid qolka.

Dukaannada tafaariiqda, xarumaha kaydka, iyo garaashyada ogolaanshaha u haysta adeegsiga/kaydinta ***waxyaabaha khatarta ah***, ama oggolaanshaha u haysta ***shaqooyinka khatarta ah*****,** waa inay lahaadaan dab damiyaal oo leh qiimaha ugu yar ee heerka 2A40BC. Dab damiyaashu waa inay isku jiraan wax ka yar 30 fiit.

Dabaqyada la dagan yahay, albeergooyinka ama guryaha xaafadaha ah ee leh balakoonada furan, ama leh albaabada laga baxo ee toos kuu gaynaaya banaanka dhismaha ayaa qalabkooda dab damiska dhigan kara qolka maamulaha, qolka lama daayada (dhar dhaqaalka), qolka kaydka, ama qaanadaha banaanka. Sidaan waxaa lagu samayn karaa marka fasax laga qaato Sarkaalka Kormeerka ee Seattle Fire Department .

Jikooyinka Maqaayada waa in lagu xiraa nidaamka dab daminta oo ootomaatig ah iyo nidaamyada difaaca dabka ee loo aqoonsado difaaca qalabka cunto qalinta ganacsiga ee ku qoran kuna astaysan si waafaqsan hanaanka UL300 ee ujeedada loogu talagalay in loo adeegsado. Waxaa intaas dheer, agabka dab damiska ee la qadi karo waa in lagu xigaa meel u jirta wax ka yar 30 fiid qalabka karinta cuntooyinka ganacsiga. Qalabka karinta cuntada ganacsiga ee adeegsiga dabka dhagaxaata ah, saliidaha khudaarta ama xoolaha iyo baruurta waa in lagu difaacaa qalabka dab damiska oo la qaadi karo kaasoo leh aqoonsiga Heerka K.

Rakibaada Qalabkaaga Difaaca

Hadii qalabkaaga dab damisku ka miisaan yar yahay 40 Ibs, meel ku dhaji si dusha sare ee dab damiyuhu aysana uga sarayn wax ka badan 5 fiid dhulka. Hadii qalabkaaga dab damisku ka miisaan yar yahay 40 Ibs, meel ku dhaji si dusha sare ee dab damiyuhu aysana uga sarayn wax ka badan 3 fiid dh Xaqiiji in salka dab damiskaagu uu ugu yaraan 4 inji u jiro dhulka.

Agabka dab damiska waa in la dhigaa meel laga arki karo si fududna loogasoo qaadan karo. Waa in la dhigaa meesha dadku badanaa maraan.

Tijaabinta Sanadlaha ah

Agabka dab damiska waa in la badalaa sanad kasta si loo hubiyo inay si sax ah usii shaqeeyaan. Qofka hubinaaya shaqada dab damiyaha waa inuu ruqsad ka haystaa Seattle Fire Department. Ka fiiri bogaga jaallaha ah ee agabka dab damiska haddii dab damiye u baahan yahay in la hubiyo. Farsamo yaqaan agabka hubinaaya ayaa ku dhajinaaya astaan muujinaysa in dab damiska la hubiyay iyo marka xigta ee hubin lagu samayn doono. Waxaa laga yaabaa inay ka raqiisan tahay badalida agabka dab damiska marka loo fiirsho qarashka hubinta sanad kasta. Haddii ay sidaan tahay, waa inaad ku dhajisaa risiidka muujinaaya taariikhda aad qalabka heshay qalabka dab damiska.

ISKA BARI YEELIDA MASUULIYADA SHARCIGA: *Foomkaan Macluumaadka Caawimaada Macmiilka (CAM) looma adeegsan karo inuu badal u noqdo xeerarka iyo qaanuunada. Shakhsiyaadka waxay mas'uul ka yahiin u hoggaansamida dhamaan sharuu-daha xeerka iyo sharciyada, haddii lagu sharaxay CAM ama haddii aan lagu sharaxin.*